# Fasaxa Shaqada: Ciidaha Dhalashada, Korinta, Xafladaha Dugsiga

Time Off from Work: Birth, Adoption, School Events

## Sharciga Fasaxa Qoyska (FMLA)

Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha, sharciga dawladda dhexe ee lagu magacaabo FMLA ayaa xuquuq kuu siinaya in aad qaadan karto ilaa 12 blilood oo fasax ah. Shaqadaada waa laguu heynayaa haddiii aad qaadato fasaxa FMLA. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in shaqadaada dib laguugu soo celiyo ama lagu siiyo mid u dhiganta dhamaadka fasaxaaga FMLA.

Haddii uu kuu ururay fasax bukaan ama fasax caadi ah, waxa aad isticmaali kartaa mudada fasaxa FMLA. Waxaa laga yaabaa in madaxdaadu kugu khasbaan in aad isticmaasho. Mudada aad fasaxa ku jirto, ceymiskaaga caafimaadka waad heysaneysaa sidii adiga oo sheqeynaya oo kale. Waa in aad bixisaa lacagta bisha ee ceymiska.



## Ma ka soo baxay shuruudaha FMLA?

Si aad xaq ugu yeelato waa FMLA, waa:

1) In aad u shaqeysaa loo shaqeeyaha sharcigan qabanayo (50 ama wax ka badan oo shaqaale ah muddo 20 todobaad ah)

2) In aad shaqeysay 1,250 saacadood 12ka bilood ee ka horeeya inta aanu fasaxa bilaaban. ka hor

3) In aad ka shaqeyso goob ay 50 ama wax ka badan oo shaqaale ah ka shaqeeyaan ama meel u jirta 75 mayl, oo aad

4) Aad ka shaqeysay goobtaas ugu yaraan 12 bilood.

## Waa maxay sababaha aan u isticmaali karo fasaxa FMLA?

Shaqaalaha oo dhan waa ay isticmaali karaan fasaxooda FMLA iyaga oo isu raacinaya sida ay u doortaan:

- Dhaawac khatar ah oo jirka ama maskaxda ah oo u baahan daryeel caafimaad.
- Si ay u xanaaneeyaan waalid, xaas/say, ama ilmo xaalad caafimaad oo khatar ah la soo deristay.
- Qaliin, ama bogsashada qaliinka ka dib.

Qof dumar ahoo u qaadaneysa 12 todobaad oo fasaxa FMLA isku dhafka sida soo socota:

- dhalmada ka hor
- in aysan wax qabsan karin uurka dartiis (tusaale ahaan, walaca)
- naafanimo kaga timaada xagga uurka dhalmada ka dib. Xilliga dhalmada ka dib. Waxa ay qeyb ka noqon kartaa naafada mudada gaaban ah.
- la joogista ilmaha dhalmada ka dib inta mudadu ka dhamaato.
- sababo la xiriira la wareegidda ilmo aad korsato ama ilmo laguu dhiibay.

Waalidka shaqaalaha ah ee aan ilmaha uurka ku sidin iyagu waxa ay u isticmaali karaan 12 asbuuc ee Fasaxa Qoyska ah (FMLA) qaab walba oo ka mid ah kuwan soo socda:

- Inuu xanaaneeyo xaas xaaladeedu khatar ku jirto, oo ay ka mid tahay xaaald la xiriirta uurka.
- la joogista ilmaha dhalmada ka dib.
- Sababo la xiriira la wareehidda ilmoaad korsato ama ilmo laguu dhiibay.

## Ma kala qeybsan karaa fasaxa FMLA?

Haa. Waxaa laguu ogol yahay in aad FMLA u qaadan si joogta ah ama kala googo'an. Fasaxa waxa looqaadan karaa qeybo yaryar. Tusaale ahaan, haddii aad leedahay balan dhakhtar todobaadkii hal mar 3da galabnimo, laakiin aad inta badan shaqeyso ilaa 5ta galabnimo, waxa aad qaadan karata fasax kala googo'an todobaadkii hal mar muddo laba saac si aad caafimaadkaaga u daryeesho.



**Fiiro gaar ah:** Fasaxa ilmaha dhashay aad la joogto si aad isu barataan qaado hal mar oo xiriir ah, haddii aan loo shaqeeyuhu ogolaan si ka duwan sidaas.

## Maxaa la iga doonayaa in aan sameeyo si aan u qaato FMLA?

Waa in aad goobta shaqada siisaa 30 maalmood oo ogeysiis ah, haddii aad. Haddii aadan siin, ogeysiis sida ugu dhaqsaha badan. Waa in aad u sheegto goobta shaqada sababaha aad uga soo baxday shuruudaha FMLA. Kani waa xafiiskaaga shaqaada oo ogsoon in aad weydiisaneyso FMLA. Fasax bukaan oo aad weydiisato kaliya kuma filna.

Loo shaqeeyaha waxa uu ku weydiiisan karaa cadeyn ku saabsan xaaladda, sida cedyn uu soo qoro dhakhtarkaaga. Loo shaqeeyaha waxa uu la xiriiri karaa dhakhtarkaaga si uu hubiyo macluumaaka.

## Sharciga Minnesota Uuureyda Iyo Waalidnimada Ee Fasaxa

Sharciga waxa ogol yahay ilaa 12 todobaad oo faax lacag la'aan ah:

- waalidka dhalay ama korsaday ee la xiriir dhalashada ama ilmo aad korintooda la wareegeyso.
- Qof dumar ah xilliga uurka, ama naafanimo kaga timaadda uurka, dhalmada ama xaalado la xiriira.

Xaaladaha qaarkood, fasaxa la xiriira dhalmada ama la wareegidda ilmo aad korsato waa in la qaataa 12 bilood gudahood ee xiliga dhalamada ama la wareegidda ilmaha.



Waxa aad xaq u leedahay inuu kuu sii socdo ceymiskaaga caafimaadka ee shaqada inta aad fasaxa ku jirto, laakiin waxaa suurogal ah in aad bixiso kharashka ceymiska ee bil kasta.

Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha Sharciga Minneasota ee Uurka iyo waalidnimada, waxaa laga yaabaa in qofka shaqalaaha ah uu kuu xisaabo labadaba isku mar si uu uga hortago in aad laba fasax qaadato Laakiin shaqaalaha uurka leh waxa ay qaadan karaan fasax caafimaad oo daryeelka **uurka ah** darayo waqtigaa 12 asbuuc ee fasaxa uurka loo qaato. Daryeelka uurku waa waqti ka horeeya dhalmadda. Waxaa laga yaabaa in goobta shaqada fasax laga siiyo haddii aad qaadaneyso macaashka ama aad fasaxa u qaadaneyso Uurka ama Waalidnimada.

Waa in loo shaqeeyaha kuu soo celiyaa shaqadaada ama ku siiyaa shaqo u dhiganta fasaxa ka dib.

## Ma ka soo baxa Shruruudaha Sharciga Minnesota ee Uurka Iyo Waalidnimada?

Waxa aad qadan kartaan fasaxan haddii:

1) Aad u shaqeyso shirkad ay u shaqeeyaan ugu yaraan 21 qof,
2) Waxa aad halkaas ka shaqeysay ugu yaraan 12 bilood fasaxa ka hor, oo
3) Ka shaqeysay ugu yaraan kala bar waqtiga (sida lagu qeexay sharciga u degsan loo shaqeeyaha) 12kii bilood ee ka horeeyey fasaxa.

## Fasaxa Waalid La Wareegaya Ilmo Uu Korsanayo

Haddii aad la wareegeyso ilmo aad korsaneyso laakiin aadan ka soo bixin shuruudaha fasaxa FMLA ama fasaxa waaalidnimada ee Minnesota, waxaa laga yaabaa in aad ka soo baxdo shuruudaha fasaxa la wareegidda ilmo aad korsato. Haddii loo shaqeeyuhu kuu ogolaado fasaxa dhalmada ama uureyda, waa in ay ogolaadaan fasaxa la wareegidda ilmo aad korsaneyso.

Loo shaqeeyaha u ogolaada in aabaha ilmaha u dhashay fasax u qaadan karo ama hooyadu u qaadan karto fasaxa uurka ama dhalmada waa inuu siiyaa waqti kaasoo u dhigma hooyada ama aabaha la soo wareegaya ilmo uu korsado. Laakiin waa inay ugu yaraan 4-asbuuc noqotaa. Fasaxaas waxa uu ka bilaabanayaa ka hor, ama waqtiga, ilmaha la keeno guriga. Waqtiga fasaxa ah waa in lagu beegaa marka ilmaha guriga la keeno ama la doonayo in ilmaha la xanaaneeyo.

## U Fududeynta Uurka

Goobaha shaqada intooda badan waa in ay sameeyaan u fududeynta suuro galka ah ee shaqaalaha uurka leh oo weydiista. Laakiin shaqooyinku ma aha inay maciin bixiyaan haddii ay taasi shirkadda u keeni qaxar aan laga bixin karin marka laga reebo kuwan soo socda:

- Awoodida isticmaalka musqusha in badan iyo waqti cunto cunid iyo biyo cabid loo siiyo oo badan
- Awoodida in la fadhiyo inta la shaqeynayo
- Ku kooba wax qaadida 20 rodol

Haddii aadan ka soo bixin shuruudaha u degsan FMLA ama Sharciga Uureyda Iyo Waalidiinta ee Minnesota, waxa aad qaadan kartaa fasaxa uureyda si laguugu fududeeyo.

## Hooyooyinka Nuujinaya

Haddii aad tahay hooyo nuujineysa, shaqaalaha waxaa waajib ku ah in ay ku siiyaan fasaxa suurogalka ah maalin kasta si aad naashaha caanaha uga saarto oo aad ilmahaaga meel ugu keydiso. Shaqaddu kaama ay yareyn karto lacagta aad ku shaqeyso iyadoo sababtu tahay qaadashada waqti aad caanaha naasaha caaga isaga listo. Waxaa kale oo suurogal ah, in aad fasax ka dhigan karto waqtiga nasashada ee horey laguugu qorsheeyey.

Shaqadaaddu waa inay isku daydo inay ku siiso goob aad caanaha naasaha isaga listo:

- waa in aysan aheyn suuliga ama qubeyska.
- waa in ay noqotaa meel qarsoon
- waa in ay noqotaa meel ka xiran shaqaalaha iyo dadweynaha.
- waa in ay noqotaa meel u dhow goobta shaqada, oo leh bareesada korontada.

## Fasaxa Kulanka Dugsiyada Iyo Ciyaaraha Ardayda

Waxa aad qaadan kartaa ilaa 16 saacadood oo fasax ah 12kii biloodba si aad uga qeyb qaadato kulanka dugsiyada ama waxyaabaha la xiriira waxbarashada ardayda. Loo Shaqeeyaha khasab kuma aha in ay ku siiyaan fasax lacag lagu siiyo laakiin xaq ayaad u leedahay in aad fasax qaadato si aad uga qeyb qaadato kulanka dugsiga iyo waxyaabaha la xiriira.

## Ma ka soo baxa Shuruudaha Fasaxa Kulanka Dugsiyada Iyo Waxyaabaha La Xiriira



Waxa aad qadan kartaan fasaxan haddii:

1) Aad shaqeysay kala bar waqtiga
2) Ilmahaaga da'diisu ka yar tahay 18jir, ama 20 laakiin uu weli dhigto dugsiga sare.
3) Kulanka dugsiyada iyo waxyaabaha la xiriira lama qaban karo waqti ka baxsan saacadaha shaqada, oo
4) Loo sheeqayaha ay waajib ku tahay inuu kuu fiidiyo u fududeynta suurogalka ah si aad fasax u qaadato.

## Waqtiga Jiradda iyo Amaanka ee la Kasbadoo ee Minnesota

Waqtiga Jiradda iyo Amaanka waa fasax lacagtu kuu socoto oo khasab ku ah in shaqadaddu ay ku siiso aan ka ahayn inaad tahay:

- shaqaale dowladda dhexe,
- qandaraasle madax banaan,
- tabaruce ama dab-damiye lacagta la siiyo markii la wacaba,
  tababaruce ama shaqaale gawaarida gurmadka degdeg ah oo lacag la siiyo markii la wacaba,
- mas'uul gobol oo la soo doortay, ama
- shaqaale beereed oo ku meelgaar ah

Waa khasab inaad hesho lacagta caadiga ah ee lagu siiyo inta aad jiradda ku maqan tahay. Laakiin tani ma ay jirto haddii lacagta lagugu siiyo gundhig kale oo aan ka ahayn mushaar, ama saacadle. Sidda gunno ama shaqo markaa aad qabato oo hal ah.

Lacagta ee caadiga ah kuma ay jiraan:

- gunooyinku,
- lacagta dheer lacagta caadiga ah ee saacadii lagu shaqeeyo ee waqtiyadda qaarkood la bixiyo,
- saacadaha dheeraadka ah,
- lacagta siyaadadda ee la bixiyo faystooyinka ama maalmaha qaarkood ee asbuuca,
- burooyinka, ama
- bakhshiishka

**Ogow:** Hadddii lacag gunno ah uun aad ku shaqeeyso ama shaqo markaa qabanayso, waa khasab in lagu siiyo ugu yaraan lacagta ugu yar ee lagu shaqeeyo.

Lacagtan adigoo maqan lagu siinayo waxa ay dhici kartaa uun haddii iskuulka ilmahaaga ama goob ilmaha lagu hayo la xiro iyadoo sababtu tahay cimildda oo xun ama xaalad degdeg ah oo korortay.

Waxa aad kasban 1 saac oo jirro ama amaan ah 30 kii saac ee aad shaqeysaba. Waxa aad kasban kartaa ilaa iyo 48 saac sannad walba ama ka badanba haddii ay shaqadaaddu taa ay doorato. Haddii magaaladda aad ka shaqeysaa ay leedahay sharciyo kale oo ilaalin ah, shaqaddu waa inay taa u hogaansantaa.

## Xaq ma u leeyahay Fasaxa Jiradda iyo Amaanka ee La Kasbado?

Waxa aad xaq u leedahay fasaxa jirradda iyo waqtiga amaanka haddii aad:

- u shaqayso ugu yaraan 80-saacadood sannad shaqo Minnesota iyo
- aadana ahayn qandaraasle madax-banaan.

Xaq baad u leedahay xataa haddii aad tahay shaqaale ku meelgaarka ah ama saacado yar shaqeeya. Qaar ka mid ah qoysaska daryeel-bixiyeyaasha ah iyagoo adeegsanaya deeqda gargaarka macmilka waxa ay dooran karaan inaysan qaataan fasaxan. Shaqaalaha ku jira heshiiska wadarta gorgortanka shaqaalaha ee saraha iyo dhismayaashu waxa ay dooraan karaan sidoo kale inaysan qaadab fasaxan.

## Wixii su’aalo ah?

**Minnesota Department of Labor and Industry** *(Waaxda Shaqaalaha Iyo Warshadaha ee Minnesota)*
www.dli.mn.gov
(651) 284-5005 ama
1-800-DIAL-DLI (1-800-342-5354)

**U.S Department of Labor** *(Wasaaradda Shaqada Ee Mareykanka)*
www.dol.gov/whd
1-(866) 4- USWAGE (5970)     (1 (866) 487-9243)

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**